

COVID-19 | Maatregelen | 02/11/2020

Somali | Vertaald uit het Nederlands

Talaabooyinka 2 Nofeember

Hordhac

Dawladdu waxay leedahay xeerar si ay fayraska Koronaha u joojiso. Xushmee xeerarka. Haddii aad sidaas yeesho xanuunku kugu dhici maayo qof kalena ku ridi maysid. Bilayska ayaa ku kantarooli kara.

Fiiro gaar ah: Magaalooyinka iyo degmooyinka qaarkood waxay leeyihiin xeerar dheeri ah. Hubi bogga interneetka ee magaaladaada ama degmadaada.

xeerar oo dahabi ah

- Marar badan gacmahaaga ku dhaq biyo iyo saabuun.
- Xiro maaskaro afka ah
- Ka fogow ugu yaraan 1.5 mitir dadka kale.
- Xiriir kaaga dhaw ku xaddid ugu badnaan 1 qof. Dadka aad xiriirka dhaw la leedahay In aad 1.5 mitir kala fogaataan looma baahna.
- Fiiro dheeri ah u yeelo bukaanada (nugul) halista ku jira:
 - dadka da'doodu ka wayntahay 65 sano.
 - dadka wadnaha, sambabada ama kalyaha dhibaato ka haysato
 - dadka infekshanka degdeg u qaada.
- Ku shaqee guriga.
- Si fiican u layri guriga: daaqadaha fur.
- Sida fiican waa in aad dadka dibadda kula balanto.

In magaalo kale ama dal kale la aado

- Beljamka gudihiisa:
 - Si xor ah ayaad ugu dhax safri kartaa.
 - Ma isticmaashaa gaadiidka dadweynaha (bas, taraam ama tareen)? Ma ka wayntahay 12 sano? Waa in aad xirato mar kaas maaskaro afka ama shaal aad ku daboosho afka iyo sanko. Taas waa waajib.
 - Laguuma ogola inaad banaanka u baxdo inta u dhexeysa 24 saac saqda dhexe iyo 5ta subaxnimo.
- Safarka dalka dibadda ka ah:
 - Waxa fiican inaan loo safrin dibaada. Tani waa talo ama waano.
 - Ma ku qasban tahay inaad safar gasho? Waxaa jira 3 nooc oo aagag ah.
 - ▶ Waxaad u safri kartaa aagagga cagaaran. Taasi waa amaan.

- ▶ Waxa fiican inaad u safrin aagagga casaanka ama liimiga.
 - ▶ Ka fiirso bogga internetka ee Wasaaradda Arimaha Dibadda: diplomatie.belgium.be.
 - Wadan kasta xeerar u gaar ah ayuu yeelan karaa. Xeerarka ka fiirso: https://diplomatie.belgium.be/nl/Diensten/Op_reis_in_het_buitenland/reisadviezen
 - Waa in aad foom (formulier) buuxisaa kahor intaadan ku soo noqon Beljemka. Waxaad ka helayaa foomka: <https://travel.info-coronavirus.be/nl/public-health-passenger-locator-form>
 - Ma soo joogtay in ka badan 48 saac aagga cas ? Waa qasab inaad xaqiijiso 3 dan shay inaad samayso mar ka aad ku soo laabato Beljiemka:
- 1 Waxa aad buux-buuxinaysaa warqadan (formulier) <https://travel.info-coronavirus.be/nl/public-health-passenger-locator-form>.
 - 2 Ma lagu soo diray fariin sms ah ? Waa qasab in aad karantiil gasho. Waxa qasab ah inaad guriga joogto ugu yaraan 10 maalmood. Kaliya banaanka u bax haddii aad dhab ahaan u baahan tahay. Tusaale ahaan: inaad aaddo farmashiga, diktoorka ama supermarket. Xiro mar kasta maaskaro afka ah.
 - 3 Fariin sms ah ma lagu soo diri waayay ? Qasab ma aha in aad karantiil gasho.

Shaqo

- Ku shaqee kuriga, Tani waa waajib.
- Ma ku qasbantahay in aad shaqo aaddo?
 - Waa inaad xirataa maaskaro afka ah.
 - Si fiican u layri guriga: daaqadaha fur.
- Su'aalo ma qabtaa? Waxa macluumaad ku siindoona maamulahaaga.

Dukaammada

- Dukaamada muhiimka ah way furan yihiin. Tusaale ahaan: supermarket, rootiga, farmashiyaha ama boostada. Xarumaha jardiinooyinka, wargeysyada wararka iyo sidoo kale dukaamada dhismahu way furan yihiin.
 - Waxaad la adeegan kartaa ugu badnaan 2 qof.
 - Waxaad adeegan kartaa ugu badnaan 30 daqiiqo.
 - Xiro maaskaro afka ah. Tani waa waajib.
- Dhamaan dukaamada kale wayxiranyihiin. Alaabo waad ka soo qaadan kartaa ama way kuu keeni karaan.
- Suuq ayaa jira. Suuqyada alaabada la isticmaalay, suuqyada jiilaalka iyo suuqyada krismaska lama oggola.
- Dukaanka habeenkii shaqeeya waxa uu furan yahay ilaa 22 saac habeenkii.
- Lama oggola inaad khamro soo iibsato wixii ka dambeeya 20 ka saac (8da fiidnimo).
- Timo-jaraha ama goobaha qurxinta gaarka way xiranyihiin.

Hoteellada, maqaaxiyaha iyo kafateeriyadaha

- Kafateeriyadaha iyo maqaaxiyaha waa la xiray.
- Cunto waad ka soo qaadan kartaa ilaa iyo 22ka saac (10ka habeenimo).

Xiriirka bulshada

- Waxaad xiriir dhow la yeelan kartaa ugu badnaan 1 qof oo isla isaga ah. Masaafada dhan 1.5 mitir markaa looma baahna.
- Dad ma rabtaa inaad guriga ku casuunto? Waxaad casuumi kartaa ugu badnaan 1ka qof ee xiirriir kaaga dhaw ah qoys kiiba.
- Kalidaa ma nooshahay? Waxaad gurigaaga ku casuumi kartaa qofka aad xiriirka dhaw leedihiin iyo hal qof oo kale. Labada qof isku mar ma wada joogi karaan gurigaaga.
- Banaanka dad ma isku raacaysaan? Waxaad is raaci kartaa ugu badnaan 4 qof. Waa in aad ilaalisaa kala fogaanshaha masaafada dhan 1.5 mitir. Caruurta ka yar 12 sano tirada kuma jiraan.

Dhaqdhaqaaqa

- Waxaad dibadda kula jimicsan kartaa ugu badnaan 4 qof. Ka fogow daka 1.5 mitir.
- Naadiyada isboortiga, barkadaha dhabaasha iyo xaruma jimicsiga way xiranyihiin.

Waqtiyada firaaqada

- Wax walba way xiran yihiin. Tusaale shaneemooyinka, goobaha kkamaar-ka, jardiinooyinka madadada iyo xadiiqooyinka.
- Ma jiraan dhacdooyin ama bandhigyo. Tusaale ahaan: tiyaatar ama riwaayado
- Maktabadaha ayaa wali furan.
- Beera banaanka ee lagu ciyaaro way furan yihiin.
- Jardiinooyinka fasaxa ayaa xirmaya 3 Nofeembar. Barkadaha dhabaasha, makhaayadaha iyo baarka ku yaal beerta ayaa durbaba la xiray.

Diinta

- Adeegyada diiniga lama ogola
- Guryaha cibaadadu way furanyihiin.
 - Waxa joogi kara ugu badnaan 4 qof.
 - Ilaali kala fogaanshaha masaafada 1.5 mitir ah.
 - Waa in aad xirataa maaskaro afka.
- Aaska waa la ogol yahay waxaa ka soo qayb gali kara ugu badnaan 15 qof. Kadib cunto la ma ogola.
- Aroosyada waa la ogolyahay. Tan waxaa kaliya loo oggol yahay lammaanaha arooska ah, ugu badnaan 2 markhaati, diiwaan-hayaha dhalashada iyo guurka ama adeegaha qayta cibaadada (tusaale ahaan wadaad ama imaam).

Xanaanooyinka (Crèches) iyo Iskoolka

- Xanaanooyinka (crèches) way furan yihiin.
- Ma jiro wax cashar ah illaa 15 ka Nofeembar. Iskoolkaaga ayaa macluumaad dheeri ah ku siin doona.

Dhiirigelin

Xeerarkan waxa ay muhiim u yihiin caafimaadka qof kasta. Qofkasta waxa laga raba in uu xushmeeyo.

Inaad sidaa yeesho waad ku mahadsantahay. Si wada jir ah ayaan fayraska Corona-ha u joojinaynaa.